


Taageeridda Waxbarashada Ilmahaaga Iyadoo loo sii marayo Imtixaan, Qiimeyen iyo Warbixin-sameyn

Ujeeddada laga leeyahay
imtixaanka iyo qiimeynta
waa in lagu hagaajiyo
waxbarashada ardayga



Laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2010-11 ardaydu waxay guriga la iman doonaan kaarar cusub oo warbixineed ee gobolka oo la hagaajiyey. Isbedeladaan waa qeyb ka mid ah '*Guul Kobcinta' Growing Success*, nadaamka dib-loo cusubooneeyey ee dowladda ee imtixaanka, qiimeynta iyo ka-warbixinta wax-qabadka ardayga.

Waalid ahaan doorkeeygu maxuu yahay?

Waan ognahay in idinku, waalid ama wali ahaan, aad tihiin lamaanayaal muhiim u ah waxbarashada ilmahiina iyo in ilmaha aay dugsiga ku sii fiicnaadaan marka waalidkood aay ku howlan yihiin.

Waan ognahay in aad dooneysaan warar fasiix ah, macno leh lana fahmi karo oo ku saabsan sida uu ilmahaaga dugsiga ku yahay. Waan ognahay in aad dooneysaan in aad si joogto ah u war uga heshaan macallinka ilmahiina sannad dugsiyeedku inta uu socdo oo dhan. Nadaamkan – oo wata kaararkiisa warbixineed ee cusub – wuxuu gacan ka geysan doonaa in aay taasi dhacdo.

Maxaa Ardayda dugsiyada hoose-dhexe uga duwan siddii hore?

Laga bilaabo sannad dugsiyeedkan, aradayda dugsiyada hoose-dhexe Fasalada 1 ilaa 8 waxay guriga la iman doonaan kaar warbixineed oo cusub oo horumarka deyrta iyo laba kaarar warbixineed ee gobolka oo wax-laga-bedelay, mid jiilaalka dhexdiisa ah iyo mid dhamaadka sannad dugsiyeedka ah.

Kaarka cusub ee warbixinta ee horumarka deyrta:

- wuxuu dhiirigelinayaa isgaarsiin hore loo bilaabo oo joogto ah oo adiga iyo macallinka ilmahaaga idiin dhaxeysa
- wuxuu kuu sheegayaa sida wanaagsan uu ilmahaaga u yeelanayo xirfadaha waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo ee aan ognahay in aay lagama maarmaan u yihiin guul gaarid êxito
- waxuu ka sii warbixinayaa dhamaan maadooyinka waxbarasho – sida luqadda, xisaabta, daraasooyinka bulsho, saayniska iyo farsamada – laakiin halkii dhibco ama buundooyin la siin lahaa, wuxuu kuu sheegi doonaa horumarka uu ilmahaaga sameynayo siduu yahay: “aad u wanaagsan”, “wanaagsan” ama “si dhib leh”
- wuxuu muujinayaa meelaha uu ilmahaaga ku xoogan yahay iyo meelaha aay tahay in la hagaajiyo qiimeynta inta aan la dhameystirin
- waxaa ku jira faallooyin shaqsi-waafaqsan ah oo ka yimi macallinka ilmahaaga oo macno sameeynaya fasiixna ah.

Kaarka gobolka ee warbixinta dugsiyada hoose-dhexe oo la wanaajiyey:

- wuxuu sidoo kale culeyska saarayaa oo tusaale ka bixinayaa xirfadaha waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo ee la iska rabo
- wuxuu leeyahay meel waasac ah oo loogu talagalay macallinka in uu ku saa'idiyo faallooyin shaqsi-waafaqsan oo macno sameeynaya, fasiixna ah oo u sameysan si aad fahmi karto inta u le'eg yahay horumarka uu ilmahaaga sameynayo
- wuxuu isticmaalaa darajo xarfo ah oo loogu talagalay Fasalada 1-6 iyo darajo boqoleey % 'percentage' ah oo loogu talagalay Fasalada 7-8 si aad si fasiix ah ugu fahamto sida uu ilmahaaga ku yahay dugsiya
- wuxuu bixiyaa talooyin ah sida aad guriga gacan ugu siin karto barashada ilmahaaga.

Goormuu ilmahayga guriga keeni doonaa kaararkan warbixineed ee gobolka ee dugsiya hoose-dhexe?

Waxaa jira saddex xilli oo ay tahay in la sameeyo warbixin rasmi ah oo loogu talagalay fasalada hoose-dhexe.

1. Kaarka cusub ee warbixineed ee horumarka deyrta waxaa la bixin doonaa inta u dhaxeysa Oktoobar 20keeda iyo Nufeembar 20keeda.
2. Kaarka cusub ee gobolka ee ugu horeeya waxaa la bixin doonaa inta u dhaxeysa bisha kowaad 20keeda iyo bisha labaad 20keeda.
3. Kaarka labaad ee gobolka waxaa la bixin doonaa dhamaadka sannad dugsiyeedka.

Taariikhaha saxa ah waxaa dejiya guddoonada waxbarashada.

Kaarar goboleedka ee warbixinta dugsiyada sare wax ma iska bedeleey?

Haa. Waxyaabaha lagu wanaajiyey kaararka warbixin goboleedka ee dugsiyada sare waxaa ku jira:

- ahmiyad dheeraad ah, oo tusaaleyniye xirfadaha waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo ee la iska doonayao [eeg dhexgelinta]
- warar dheeraad ah oo ku saabsan heerarka kala duwan ee wax-qabad iyo sida loogu waafajinayo dhibco % boqoleey ah
- faallooyinka macallinka waxaa laga dhigay mid shaqsiga waafaqsan, fasiix ah oo macno sameeynaya.

Xirfadaha Waxbarasho iyo Dabeecadaha Shaqo ee Lagama-maarmaanka ah

Kaararka warbixinada Ontario waxaa jira lix xirfadood oo waxbarasho iyo dabeecado shaqo oo hadda culeyska la saaro dhamaan Fasalada 1 ilaa 12:

- | | |
|----------------------|-----------------------------|
| • Mas'uuliyad | • Wada-shaqeyn |
| • Qabanqaabo | • Is xilqaamid 'Initiative' |
| • Iska wax u qabasho | • Is-nadaamin |



Ontario

Ministry of Education

Elementary Progress Report Card

[Board logo]

Date:

Student:		OEN:	Days Absent:	Total Days Absent:
Grade:	Teacher:		Times Late:	Total Times Late:
Board:		School:		
Address:		Address:		
		Principal:		Telephone:

[Space for Board Information]

1

Meel banaan oo guddoon waxbarasho oo walba uu iskiis u astaysto isticmaalideeda. Noocyada wararka ee lagu dari karo waxaa ka mid ah ooraah muujinaysa aragtida guddoonka, ujeeddadooda ama hadafyadooda waxbarasho.

Learning Skills and Work Habits

E – Excellent G – Good S – Satisfactory N – Needs Improvement

Responsibility

- Fulfills responsibilities and commitments within the learning environment.
- Completes and submits class work, homework, and assignments according to agreed-upon timelines.
- Takes responsibility for and manages own behaviour.

Organization

- Devises and follows a plan and process for completing work and tasks.
- Establishes priorities and manages time to complete tasks and achieve goals.
- Identifies, gathers, evaluates, and uses information, technology, and resources to complete tasks.

Independent Work

- Independently monitors, assesses, and revises plans to complete tasks and meet goals.
- Uses class time appropriately to complete tasks.
- Follows instructions with minimal supervision.

Collaboration

- Accepts various roles and an equitable share of work in a group.
- Responds positively to the ideas, opinions, values, and traditions of others.
- Builds healthy peer-to-peer relationships in person and through personal and media-assisted interactions.
- Works with others to resolve conflicts and build consensus to achieve group goals.
- Shares information, resources, and expertise, and promotes critical thinking to solve problems and make decisions.

Initiative

- Looks for and acts on new ideas and opportunities for learning.
- Demonstrates the capacity for innovation and a willingness to take risks.
- Demonstrates curiosity and interest in learning.
- Approaches new tasks with a positive attitude.
- Recognizes and advocates appropriately for the rights of self and others.

Self-Regulation

- Sets own individual goals and monitors progress towards achieving them.
- Seeks clarification or assistance when needed.
- Assesses and reflects critically on own strengths, needs, and interests.
- Identifies learning opportunities, choices, and strategies to meet personal needs and achieve goals.
- Perseveres and makes an effort when responding to challenges.

Strengths/Next Steps for Improvement

3

Meelaha ardaygu-ku-xoogan yahay/
Talaabooyinka ku-xiga ee wax Hagaajineed:
Macallinka ayaa ku dari doona faallooyin shaqsi ah oo si fudud loo fahmi karo oo ka hadlaya horumarka ardaygu ka gaaray lixda xirfadood ee waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo.

2

Saf gudban (column) oo macallimiinta aay ku dari doonaan astaan xaraf ah si aay u soo gudbiyaan horumarka ardayga ee lixda xirfadood ee waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo:

E – excellent (heer-sare)

G – good (fiican)

S – satisfactory (lagu-qanci-karo)

N – needs improvement (waxuu u baahan yahay la imaasho dadaal dheeri ah)

Student: OEN: Grade:

ESL/ELD– Achievement is based on expectations modified from the curriculum expectations for the grade to support English language learning needs.

IEP– Individual Education Plan
NA – No instruction for subject/strand

Subjects	Progressing With Difficulty	Progressing Well	Progressing Very Well	Strengths/Next Steps for Improvement
Language				5 Meelaha ardaygu-ku-xoogan yahay/ Talaabooyinka ku-xiga ee wax Hagaajineed: Macallinka wuxuu faallo ka bixinayaa sida ilaa iyo maanta ardaygu uu horumar uga sameynayo si uu ku gaaro waxa manhajka ka filayo ee la xiriira maadooyinka, wuxuu tilmaamayaa meelaha ardaygu uu si wanaagsan ugu xoogan yahay, meelaha ku adag iyo talaabooyinka ku xiga ee wax hagaajineed.
Reading, Writing, Oral Communication, Media Literacy				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ NA				
French				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ NA				
☐ Core ☐ Immersion ☐ Extended				
Native Language				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ NA				
Mathematics				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French				
Science and Technology				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French				
Social Studies				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French				
Health Education				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French				
Physical Education				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French				
Dance				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French ☐ NA				
Drama				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French ☐ NA				
Music				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French ☐ NA				
Visual Arts				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French ☐ NA				
☐ ESL/ELD ☐ IEP ☐ French ☐ NA				

To Parents/Guardians and Students: This copy of the progress report card should be retained for reference. The original or an exact copy has been placed in the student's Ontario Student Record (OSR) folder and will be retained for five years after the student leaves school.

Teacher's Signature X Principal's Signature X

[Space Designated for Board]

6

Meel banaan oo guddoon waxbarasho oo walba uu iskiis u astaysto isticmaalideeda. Tusaalooyinka wararka/isticmaalka waxaa ku jira faalloyin dheeraad ah in la bixiyo, codsashada wareysi lala yeesho waalidka ama ardayga, sharaxidda talaabooyinka ku xiga oo lagu dhaqaaqi doono, la socodsiinta wararka ku saabsan howlaha dugsiga.

4

Safar gudban oo macallimiintu aay xariiqaan labo 'boxes' sanduug midkood si aay u soo gudbiyaan in ardaygu maado gaar ah horumar ugu sameynayo “si dhib leh”, “si fiican” ama “si aad u fiican”, tusaale ahaan xisaab, saaynis, daraasado bulsho, luqad, waxbararidda la xiiiriirta caafimaadka iyo jir-dhiska.

83-0465E (2010/01) © Queen's Printer for Ontario, 2010 Grades 1–6 Page 2 of 2

Goorma ayeeey ardayda dugsiga sare guriga la iman doonaan kaarar goboleedka warbixineed?

Sidii horeba ay ahaan jirtay, dugsiyada (lixbilood laha) simistarada leh waxay kaararka warbixinta guryaha u soo diri doonaan laba jeer simistarkiiba. Dugsiyada aan simistarada lahayn waxay bixin doonaan kaararka warbixinta saddex jeer sannadkii.

Taariikhaha saxda ah waxaa dejiyan guddoonada waxbarashada.

Faallooyinka macallimiintu ma noqon doonaan kuwo si fudud loo fahmo?

Haa. Dhamaan kaararka warbixinta ee cusub waxay lahaan doonaan meelo waafi ah loogu talagalay in macallinka in uu ku saa'idiyo faallooyin ku saabsan waxa uu ilmahaagu yaqaan oo uu sameyn karo. Waxay u isticmaali karaan meesha in aay ku tilmaamaan waxa uu ku xoogan yahay ilmahu iyo talaabooyinka ku xiga oo wax lagu wanaajinayo iyo sidoo kale in aay ku daraan faallooyinkooda shaqsigu ah iyo sida ay iyaga wax ugu muuqdaan.

Macallinka ilmahayga marar kale war ma ka heli doonaas?

Waa in aad war uga heshau macallinka ilmahaaga si joogto ah sannad dugsiiyeedka inta uu socdo oo dhan. Marka laga reebo kaararka warbixinta, noocyada kale ee isgaarsiinta waxaa ku jira shirar macallinka-waalidka ama waalidka-macallinka-ardayga u dhaxeeya wareysiyo, taleefan, liis-la-saxayo 'checklists' iyo warbixino aan rasmi ahayn.

Sidee ayeeey macallimiinta ku go'aamiyaan ilmaheyga dhibcaha uu helo?

Macallimiintu waxay fiiriyaan shaqooyinka (assignments), imtixaanada-yar-yar 'tests', imtixaanada-waaweyn 'exams', bandhigyada iyo mashaaricda kuwaaso ka markhaati kacaya in ilmahaagu uu baranayo manhajka.

Barashadan macnaheedu waa ka weyn tahay in aad taqaan xaqiiqooyinka oo kaliya. Ardayda sidoo kale waa in aay muujiyaan in aay fahamsan yihiin waxa aay baranayaan iyagoo soo bandhigaya oo isticmaalaya waxa aay barteen. Sidoo kale waa in aay muujiyaan xirfado fikir naqdin iyo dhibaato-xalin ah.

Shaqada oo dhan dib ayaa loo eegaa iyadoo taxadar gaar ah la siinayo tayada shaqada ee dhamaadka unugga daraasadda, xilliga ama simistarka. Macallimiintu ma xisaabaan celceliska 'averages' oo kaliya. Imtixaanaadka iyo shaqooyinka oo aay eegaan howshoodu kuma koobna, ee waxay sidoo kale la hadlaan oo u kuurgalaan ilmahaaga wax-qabadkooda fasalka dhexdiisa, si aay u ururiyaan wixii warar ah ee suuragalka ah inta aaysan gaarin go'aanka kama dambeysta ah ee darajada ay bixinayaan.

Shaqada-guriga maxaa loo isticmaalaa?

Shaqada guriga ee joogtada ah waxaa loo isticmaalaa in lagu horumariyo xirfadaha waxbarasho iyo qabanqaabo, in lagu xoojiyo aqoonta iyo in la isugu diyaariyo fasalka kan ku xiga. Sidoo kale waxay gacan ka geystaan horumarinta xirfado waxbarasho iyo dabeecado shaqo oo xoogan, kuwaasoo ku sharaxan kaararka warbixinta gobolka.

Maxaa loola jeedaa “R”-ta ku qoran kaarka warbixinta gobolka ee ilmahayga ee Fasalada 1-8?

“R” macnaheedu wuxuu yahay dib wax-u-barasho balaaran ayaa loo baahan yahay maadaama aan xirfadihii iyo aqoontii maadada ee loo baahnaa aan laga soo bixin. Waa muhiim in aad kala shaqeyso macallinka ilmahaaga sidii loo sameyn lahaa istaraatiijiyooyin lagu taageerayo in ilmahaaga uu helo xirfadihii iyo aqoontii loo baahnaa.

Maxaa loola jeedaa “I”-da ku qoran kaarka warbixinta gobolka ee Fasalada 1 ilaa 10?

“I” macnaheedu wuxuu yahay macallinka ma helin macluumaad ku filan oo uu dhibco ama buundooyin ugu qoondeeyo. Tan waxay dhici kartaa, tusaale ahaan, haddii ilmahaaga uu mar dhow dugsiyada bedelay ama waqti dheer uu jiranaa.

Ciqaab loogu talagalay qaadashada qof kale shaqadii 'plagiarizing' ama qishka miyaa jira?

Haa. SSiyaasaddii ugu dambeysay ee imtixaanaadka waxay cadeyneysaa in ardayda aay mas'uul ka yihiin shaqadooda. Waxaa jiri doona ciqaabo, aay ku jiri karaan in ardayga uu helo eber, wixii ah qish, qaadasho qof kale shaqadii iyo shaqada oo aan la dhameystirin. Weydii dugsigaaga wixii ku saabsan siyaasaddiisa qaadashada qof kale shaqadii ama qishka.

Ma jiraan ciqaabo loogu talagalay shaqada oo aan la dhameystirin ama shaqada soo gudbinteeda lala daaho?

Ilmahaaga ayaa mas'uul ka ah in uu ku muujiyo waxa uu bartay ama qabtay waqti kooban oo uu macallinkiisa u qabtay.

Nidaamka Ontario waxaa ku taxan istaraatiijiyooyin badan oo uu macallinka u isticmaali karo in uu kaga hortago iyo in uu wax kaga qabto shaqooyinka maqan iyo kuwa lala daahay labadaba. Kala doorashada siyaabaha wax looga qabanayo waxay u dhaxeeyaan min naqtiimin ardayda facood ah aay siiyaan iyo in la siiyo casharo ku saabsan maamulidda waqtiga ilaa qorsheyn shaqooyinka waaweyn ah ee dugsiga oo dhan.

Fasalada oo dhan, haddii ilmahaaga uu si joogto ah ula maqnaado shaqooyin ama uu keeno waqti dambe, waxaa dhici karta in lagu muujiyo qeybta Xirfadaha Waxbarasho iyo Dabeecadaha Shaqo ee kaarka warbixinta. Ardada fasallada min 7aad ilaa 12naad waxaa dhici karta in dhibco laga jaro

Weydii dugsigaaga wax ku saabsan nidaamka shaqooyinka maqan ama lala daahay.

Heerarka waxbarashada Ontario wax ma iska bedeleen?

May. Manhajka Ontario wuxuu si cad u muujinayaa dhamaan maadooyinka iyo mowduucyada waxa laga filayo ardaydu in aay yaqaanaan oo aay sameyn karaan. Arday walba waxaa lagu imtixaamayaa oo lagu qiimeynayaa heerar sare oo goboleed oo isku mid ah.

Maxaa ahmiyad iyo culeys dheeraad ah loo siinayaa xirfadaha waxbarasho iyo dabeecadaha shaqo?

Cilmibaaris ayaa muujineysa in ardaydu aay u baahan yihiin in aay bartaan wax xaqiiqooyinka ka badan haddii aay doonayaan in aay ku guuleystaan waxbarashada dugsiga sare ka sareysa iyo dunida shaqda.

Ardayda Ontario waxay kaloo baranayaan in aay iskood isu xilqmaan, si madax banaan u shaqeeyaan, noqdaan kuwo naftooda ku tiirsan iyo in aay koox la shaqeeyaan. Dugsiyada waxay barayaan ardayda xirfado fikir naqdin iyo dhibaato xalin si loo siiyo ilmahaaga awood uu ku qabsado fursad walba oo shaqo iyo koriimo oo ka soo baxda dhaqaalaha aqoonta cusub.

Maxay tahay sababta dowladda aay u keentay nidaamka cusub ee imtixaamidda, qiimeynta iyo ka-warbixinta?

A Ujeeddada la leeyahay imtixaamidda, qiimeynta iyo ka-warbixinta waa in lagu wanaajiyo waxbarashada ardayga. Wajahaadda cusub waxay barayaasha u keentaa xujooyin cusub iyo fursado cusub oo loogu faa'iideynayo ardayda. Iyadoo ka shidaal qaadanayo aqoontan cusub, '*Guul Koobcinta*' *Growing Success* waxey cusbooneysiinaysaa oo cadeynaysaa farsamooyinka iyo hababka waxqabad ee aay macallimiinta u isticmaalaan si aay u ururiyaan ulana wadaagaan wararka waalidiinta iyo ardayda.

Mabaadi'da Aasaasiga ah

Macallimiinta Ontario waxay isticmaalaan habab la raaco oo imtixaamid iyo qiimeyn ah oo:

- cadaalad, qarsoodi-la'aan iyo sinaan ah
- taageera ardayda oo dhan
- si taxadar ah loo qorsheeyey
- si fashiix ah loogu sharaxay ardayda iyo waalidiinta bilowga sannad dugsiyeedka
- joogto ah oo kala duwan, oo bixinaya fursado marar badan ah oo ay ardaydu ku muujiyaan aqoontooda
- aay ku jiraan jawaab-celis fashiix ah, macno leh oo lagu sameeyeywaqtigii ku haboona
- ka caawiya ardayda in aay u noqdaan kuwo si madax-banaan wax u barta.

Wixii war dheeraad ah, iyo si aad u aragtid *Growing Success* oo kaamil ah, booqo shabakadda internetka ee Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education) ee ontario.ca/EDUparents